

Is-aqoonsiga Ikhtiyaariga ah ee Naafonimada

Foomka CC-305
Bogga 1 ee 1

Lambarka Xakamaynta OMB ee 1250-0005
Dhacaya 04/30/2026

Magac:
Aqoonsiga Shaqalaha:

Taariikh:

(haddii ay ku habboon tahay)

Waa maxay sababta lagaaga codsaday inaad buuxiso foomkan?

Waxaanu nahay shirkad qandaraas ama qandaraas hoosaad ka qaadatay dowladda dhexe. Sharciga ayaa nagu waajibinaya in aanu fursad shaqaaleysiinimo loo siman yahay siino dadka u qalma ee naafada ah. Hadafkeenu waa in 7% shaqaalaheena ay noqdaan dad naafonimo qaba. Sharcigu wuxu leeyahay waa inaad cabbirtaan horumarka aad ka samaynaysaan hadafkan. Si aan tan u sameyno, waa in aanu shaqaalaha iyo shaqo codsadayaa shaqo waydiino haddii ay naafo yihiin ama haddii ay marnaba naafo noqdeen. Dadku way naafoobi karaan, sidaas darteed su'aashan ugu yaraan shantii sannadoodba marbaanu dadka waydiinaa.

Buuxinta foomkani waa ikhtiyaari, oo waxa aanu rajaynaynaa inaad doorato inaad sidaas samayso. Jawaabtaadu waa sir. Qof kasta oo go'aan shaqaaleysiin leh ayaa arki doona. Go'aanka aad ku buuxinayso foomka iyo jawaabtaadu sinnaba kuuma dhibi doonto. Haddii aad rabto inaad wax badan ka ogaato sharciga ama foomkan, booqo websaydka Barnaamijka U Hogaansanka Qandaraasyada ee Waaxda Xafiiska Shaqaalaha ee Maraykanka (OFCCP) www.dol.gov/ofccp.

Sidee baad ku ogaatay inaad naafo tahay?

Naafonimadu waa xaalad aad u xaddidaysa hal ama ka badan oo "hawlahahaaga nololeed ee waawayn ah." Haddii aad xaaladdaas leedahay ama aad mar uun yeelatay, waxaad tahay qof naafo ah. **Naafonimada waxa ka mid, in kastoo aanay ku koobnayn:**

- Cudurada isticmaalka xad dhaafka ah ee khamrada ama maandooriyayaasha kale (kuma jirto inaad hadda maandooriye sharci darro ah isticmaasho)
- Cudurada daciifiya difaaca jirka, tusaale ahaan, cudurka unugyada difaacu jirku weeraraan (lupus), muruqyada iyo jiraka oo adkaada ama xanuuna (fibromyalgia), roomatiisim, Aydhiska (HIV/AIDS)
- Indho la'aan ama aragtida oo gaaban
- Kansar (waqti la soo dhaafay ama hadda)
- Cudurada wadnaha ama xiddida dhiiga
- Cudurka xasaasiyadda gulatiinka (Celiac)
- Cudurka xakamayn la'aanta murqaha (Cerebral palsy)
- Dhego la'aan ama dhego culays aad u daran
- Sonkorow/macaan
- Raad dhaawaceed, tusaale ahaan, dhaawacyo ka dhashay gubasho, nabarro, shilal, ama cuduro lagu dhasho
- Suuxdin ama cudur kale oo qallal keena
- Cudurada caloosha iyo midhicirada, tusaale ahaan, Cudurka Crohn's, cudurka calool nugaylka
- Naafonimo garaad ama koboc
- Cudurka maanka iyo maskaxda, tusaale ahaan, walbahaarka, cudurada degenaansho la'aanta dareemada (bipolar disorder), cudurka walwalka, iskitsifiriiniya (schizophrenia), Cudurada Ka Dhasha Dhacdooyinka Xun (PTSD).
- Lugaha ama gacmaha oo qofku la' yahay ama qayb ahaan la' yahay
- Naafonimo dhanka dhaqdhaqaaqa ah, isticmala gaari-curyaan, mooto, tukube/shey taageera socodka, luga kaabayaal (leg braces) ama waxyaabo kale oo la taageersado
- Xaalad caafimaadka oo habdhiska dareenka wadka ah, tusaale ahaan, dhanjaf, cudurka gargariirka murqaha (Parkinson's disease), cudurka unugyada difaaca jirku weeraraan unugyada maskaxda (multiple sclerosis)
- Cudurada ka dhasha duwanaanta habdhiska dareenkawadka qofka, tusaale ahaan, cudurka dhugmo la'aanta/dhaqdhaqaaq badnida (ADHD), cudurka dhakaakowga/ootiisimka, akhriska oo qofka dhiba (dyslexia), xaddidnaanta dhaqdhaqaaqa (dyspraxia), ama naafonimada kale ee dhanka barashada.
- Baaralees dhammeystiran ama qayb ahaan (sabab kasta)
- Xaaladaha sambabada ama neefmareenka, tusaale ahaan, tiibisho, neef, cudur kiish-haweedyada sambabadu dillaacaan (emphysema).
- Laf gaabnaan (cillaanimu)
- Dhawaac ka dhashay nabar maskaxda soo gaaray

Fadlan sax mid ka mid ah sanduuqyada hoose:

Haa, waxaan leeyahay naafonimo, ama waqtiyadii la soo dhaafay ayaan lahaa

Maya, ma aanan yeelan naafonimo oo muddooyinkii la soo dhaafayna ma aanan yeelan.

Ma rabo inaan ka jawaabo

BAYAAN CULEYS U SHEEGISTA DADWAYNAHA: Sida uu qabo Xeerka Dhimista Hawlaha Dukumeentiyeed ee 1995 qofna waajib kuma ah inuu ka jawaabo dalab macluumaad uruurineed haddii aanay macluumaad uruurintaasi muujin lambarka xakamaynta OMB oo ansax ah. Xogururintan dhammeystirkeedu waxay qaadaneysaa qiyaastii 5 daqiiqo.

Loogu talagalay Shaqo-bixiyayaasha oo Keliya

Shaqo-bixiyayaashu qaybtan waxbay ka beddeli karaan markay u baahdaan iyagoo uga dan leh xog ujeedooyin xog kaydineed.

Tusaale ahaan:

Cinwaanka Shaqada:

Taariikhda Shaqaaleysiinta: